

Executive Office

Date: 16 / 02 / 2013

Ref. No.: M.X.F / 001/2013



مكتب رئيس المجلس التنفيذي

التاريخ: 06 / ربيع الثاني / 1434 هـ

الرقم:

بسم الله الرحمن الرحيم

## BAYAAN

### Dilkii Sheekh. C/qaadir Nuur Faarax

إن الحمد لله نحمده ونستعينه، ونستغفره ونعوذ بالله من شرور أنفسنا وسيئات أعمالنا، من يهده الله فلا مضل له، ومن يضلل فلا هادي له، وأشهد أن لا إله إلا الله وحده لا شريك له وأشهد أن محمدا عبده ورسوله .

(يا أيها الذين آمنوا اتقوا الله حق تقاته ولا تموتنَّ إلا وأنتم مسلمون)، (يا أيها الناس اتقوا ربكم الذي خلقكم من نفس واحدة وخلق منها زوجها وبث منهما رجالا كثيرا ونساء واتقوا الله الذي تساءلون به والأرحام إن الله كان عليكم رقيبا)، (يا أيها الذين آمنوا اتقوا الله وقولوا قولا سديدا يصلح لكم أعمالكم ويغفر لكم ذنوبكم ومن يطع الله ورسوله فقد فاز فوزا عظيما).

أما بعد، فإن أصدق الحديث كتاب الله، وأحسن الهدي هدي محمد، وشر الأمور محدثاتها، وكل محدثة بدعة وكل بدعة ضلالة، وكل ضلالة في النار.

Intaa ka dib, waxay Jamaacada Al-ictisaam bilkitaab Wassunnah eheladii sheekha, asxaabtiisii, iyo guud ahaan umadda soomaaliyeed iyo umadda muslimka oo dhan uga tacsiiyeyneysaa geeridii naxdinta laheyd ee ku timid Alle ha u naxariistee Sheekh C/qaadir Nuur Naarax, oo shalay oo Jimce ahayd 5-04-1434H / 15-02-2013 isaga oo ku jira salaaddii casar lagu dilay masjidka Beder oo ku yaal magaalada Garoowe.

Sheekh Cabdulqaadir Alle ha u naxariistee waxaa la dilay isaga oo salaaddii casar jamaacada masjidka safka hore ku jira rakaddii saddexaad, waxaana dilay nin dhallinyara ah oo hubeysan oo kabhiisa lasoo galay masjidka, kadibna jeegada ka toogtey sheekha oo rukuucdii kor uga soo kacay, isla markiibana dib ayuu u cararay. Waxaan sheekha Ilaahay uga baryeynaa inuu geeridiisa shahaado uga dhigo jannadiisana ku abaal-mariyo, eheladii uu ka tagay iyo ummaddana samir iyo iimaan ka siiyo, aamiin.

Sheekhu dilkii Dr. Axmad Xaaji C/raxmaan ee kal hore kooxda Al-Shabaab ku dishay magaalada Boosaaso ka dib iyo ka horba wuxuu si muuqata uga digi jiray qallooca iyo inxiraafka diineed ee ay horseedka ka tahay firqada Alshabaab.

Haddaba, Jamaacadu waxay ummadda soomaaliyeed u cadeyneysaa qodobadan soo socda:

1. Sheekha Ninka dilay oo lagu magacaabo **Cabdiraxmaan Xuseen Jaamac Bille Yuusuf** oo dadweynaha reer Garoowe qabteen ka dib markii uu dhaawacay Saddex Qof oo kale waxaa caddaatay in uu ka mid yahay ururka Alshabaab, ururkaas oo horay u gaystay qaraxii Shaamow, Hargaha iyo Saammaha iyo Ardaydii Turkiga u socotay, una dilay Alle ha u naxariistee Dr. Axmad Xaaji C/raxmaan, Dr. Maxamauud Cabdi Ibraahir (Gadhweyne), Dr. Axmad C/laahi (Waayeel) Prof. Ibraahim Caddow, Sh. Abuukar Xuseen, Sh. Maxamad Tahliil iyo culimo iyo waxgarad kale oo aad u badan oo ummadda Soomaaliyeed ka mid ah, qiimowayna ugu fadhiyey ummadda Soomaaliyeed.
2. Dilkan masjidka dhexdiisa ka dhacay iyada oo salaad lagu jiro iyo qofka la dilay oo ah sheekh C/qaadir oo ah caalim diinta faafinteeda ku cirroobay oo ahaa maanta qofkii la ciseyn lahaa, wuxuu caddayn u yahay in dadka danbigaas foosha xun fuliyay ee maleegay ay yihiin dad ka fog dhaqankii islaamka, ee xurmada u yeelay masaajidda, salaadda iyo culimada geeridooda ummaddu u indho-beeleyso.
3. Sh. C/qaadir iyo culimadii kale ee ka horreysey ee firqadani laysay waxaa lagu dilay iyaga oo har iyo habeen u taagan caddaynta xaqqa kuna sabraya, taasoo ah waddadii lagu dilay nebiyo Alle soo diray, saxaabo, saalixiin iyo ducaad badan oo iyaga uga horreeyey waddadan. Sidaa awgeed waxaan ummadda xusuusinaynaa in firqiyoon Alshabaab oo kale ah ay gacantooda ku dileen khulafadii Nebi Maxamed صلى الله عليه وسلم laba ka mid ah – Cusmaan iyo Cali Alle raali haka noqdee. Ducaadda iyo culimada kalana waxaan xusuusinaynaa inay wadaddaa ku sabraan ku dhiiradaan kuna adkaystaan caddaynta xaqqa oo aysan uga gabban cidna.
4. Sheekh C/qaadir Alle ha u naxariistee wuxuu ahaa caalim ummadda Soomaaliyeed oo dhan dibad iyo gudaba ay wada taqaanno laguna bartay faafinta manhajka ahlu sunnah waljamaaca ee ay mareen ummadda qaybteedii hore ee wanaagsanayd (salafkii saalixa ahaa), Sh. C/qaadir wuxuu kaalin lama illaawaan ah ku lahaa ka hortagga manaahijta qalloocan sida takfiirka ama khawaarijta, waxaana lagu yaqaanney inuu ku dhiirraan jiray caddaynta xaqqa ciddii rabtaba ha qoonsatee.
5. Waxaan ugu baaqeynaa ummadda Soomaaliyeed ee muslimiinta ah in ay meel uga soo wada jeestaan firqaddan habawsan ee Alshabaab ee hiddaha iyo dhaqanka ka dhigtay burburinta diinta, dadka iyo dalkaba, iyagoo falalkooda kharriban ugu adeegaya danaha

cadowga liddiga ku ah jiritaanka iyo midnimada ummadda Soomaaliyeed ee muslimka ah.

6. Fal danbiyeedkan lagu dilay sheekh C/qaadir Alle ha u naxariistee wuxuu sidoo kale iftiiminayaa mashruuc halis ah oo ku jeeda guud ahaan ummadda soomaaliyeed, gaar ahaanna culimada, waxgaradka, aqoonyahanka, isimada, madaxda, ganacsatada, da'yarta iyo maatada ummadda, mashruucaas oo ay hogaaminayaan dad cadow u ah islaamka, sidaa daraadeed waxaan u cadaynaynaa ummadda Soomaaliyeed ee Muslimka ah inay Firqada Al-Shabaab ka leexatay caqiiqadada toosan ee diinta Islaamka, xalaashatayna Dhiigga dadka Muslimka ah ee Soomaaliyeed, waxaana fatwo kusoo saaraynaa in meel looga soo wada jeesto, Al-Shabaab, ehel malahan, qabiil malahan, caqiido malahan, waxaan u cadaynaynaa ummadda Soomaaliyeed inay waajib ku tahay inay ladagaalamaan, soo qabtaan, soo sheegaan cidkasta oo fikirkaas qalloocan aaminsan oo ay garanayaan si looga badbaadiyo, aysanna u baabi'in hambadda ka hartay ummadda iyo diinta.

Ugu danbayntii, waxaan ugu baqaynaa ummadda qaybaheeda kala duwan oo ay ugu horreeyaan, maamulada, culimada, waxgaradka, iyo beelaha in ay iska kaashadaan una midoobaan ka hortagga iyo la dagaalanka firqadda Al-Shabaab ee isku bahaysatay xasuuqa bulshada, iyaga oo aan cidna dhaafayn, cidna ka xishoonayn, cidna xeerinayn, culimo iyo caammo, yar iyo weyn, rag iyo dumar, aqoonyahan iyo ganacsade. Kooxdan oo u dhar-dhigatay baabi'inta ummadda iyaga oo u dilaya qof-qof iyo wadarba.



الشيخ / أحمد عبد الصمد

رئيس المجلس التنفيذي